

February 2024 Cusboonaysiinta

To: All Staff (standalone), All Families (Happening Now)

Taariikhda: Khamiis, Febraayo 8

UJEEDO: La-Socoshada: Miisaaniyada FY25 February 8, 2024

Iskuulada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay sii wadaan qorshaynta miisaaniyad sanadeedka 2025 (FY25). Habkani waxa uu ku bilaabmay ka qaybgalka dadweynaha ee ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska guga iyo dayrta 2023 si looga wada hadlo waxa ay bulshadeenu ku qiimayso waxbarashada. In ka badan 10,000 oo qof ayaa ka qayb qaatay hawlgelintan. Wixii aan maqalnay oo kooban, fadlan tixraac [FY25 Budget Engagement Summary](#).

Bishii Disembar, waxaanu wadaagnay mudnaanta miisaaniyada ee si toos ah uga yimid waxaad nooga sheegtay qiimeyaashaada. Mudnaantaas waa:


1. **Kordhinta dareenka lahaanshaha iyo dareenka badbaadada bulshooyinka dugsigeena**
2. **Hubinta in ardayda la ixtiraamo oo ay ka muuqdaan manhajkooda iyo fasaladooda**

Waxaan sidoo kale aqoonsanay hal mudnaan waxbarasho oo loogu talagalay miisaaniyadda FY25: akhris-qoraalka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida mudnaanta loo aasaasay, dib u eeg [December 2023 budget update](#).

Mudnaanta Miisaaniyadda FY25: Sii wadista Barnaamijyada waxku-oolka leh

Dorkii bilood ee la soo dhaafay, waxaan si taxadar leh u eegnay barnaamijyada badan ee ay SPPS bixiso. Habkani wuxuu diiradda saaray barnaamijyada degmada oo dhan iyo iskaashiga oo ay maalgeliyaan ilo badan oo ay ku jiraan sanduuqa guud, maalgelinta Cinwaanka iyo Qorshaha Samatabbixinta Mareykanka (ARP). Nidaamkani waxa uu ku lug lahaa aqoonsiga yoolalka barnaamij kasta iyo qiimaynta saamaynta ay ku leeyihiin natiijada ardayda iyadoo lagu salaynayo xogta la hayo.

SPPS waxay adeegsatay xogtan, oo ay weheliso mudnaanta miisaaniyada ee kor lagu tilmaamay, si ay go'aan uga gaadhaan barnaamijyada sii socon doona ka dib sannad dugsiiyeedka hadda. Soo koobid heer sare ah oo ku saabsan barnaamijyada aan u aqoonsannay in ay ku sii socdaan mudnaanta miisaaniyad kasta ayaa halkan lagu heli karaa.



Saint Paul Public Schools FY25 Budget Priorities

Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada & Mudnaanta Waxbarasho ee Sannad-Dugsiyeedka 2025

Iskuulada Ixtiraamka iyo Milicsiga leh (Qiimaha Bulshada)	Aqoonta (Mudnaanta waxbarashada)	Amniga iyo Dareenka ka mid ah Ahaanshaha Iskoolka: (Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada)
• Xarunta Saree e Tabbabarka 3M • Meelaynta Sare (AP) • BarnaamijkaGu'ga ee American Indian Raxladadaha Bdote • Syniska Duurjooga Belwin • Shaambbada Labo-Luqadlaha • Wadooyinka Shaqadda • Isku-Diiwaangalita • Como Planetarium • Koorsooyinka Fogaala-Arraga ee Degmada • Maalinta Taariikhda • Manhajka Hmong Wadashaqeynta Degmooyinka • Maamuuska Dhacdooyinka Fanka iyo Muusigga • Barnaamijka Luqaddaha Aduunka ee Asliga ah • International Baccalaureate (IB) • Mashruuca Hogaaminta Jidka (PLTW) • Qandaraaska Xulashada Wabarashada Iskuulka Sare kabacd iP (PSEO) • Xulashaa Raxladaha • Xulashada Wada-Shaqaynta	• 1:1 iPad Digital Learning Environment • Fasallada Taageerada Fasalka 9th • Bixinta Beddelka ah ee Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah(ADSIS) • Horumarka • Go'aaminta Qofka (AVID) • Qalabka Dijitaalka ah • Barnaamijka Meel-marrinta Labbo-luqad laha • Hababka Simitaanka Qiimaynta • Iskuulada Xorta Ah • Noocyada Iskuulada Dhexe (oo ay ku jiraab kuwa aasaasiga ah) • Faro Galinta Akhris ka SIPPS • Waxbarasahda Waxaan hadda u baahanahay (WINN) • Xulashada Wadashaqaynta	• Dhacdada Aqoonsiga Shaqaalaha • 25-ka-sano • Shaqaalaha Dheeraadka ah ee Latalinta & Bulshada • Goleyaasha La-talinta Waalidka (PACs) • Hubi oo Ku xidh • Deeqaha ka hortaga Isticmaalka Kiimikada • Waxbarashada qalabka Musuusiga ee Dheeraaka ah ee maalinta (EDL) • Kobcinta Xirriirinta • Gay Straight Alliance (GSA) Clubs • La-talinta Iskuulada Srae • Khadka Caawinta Luqadda • Ceshesada Macalimiinta Hadda Jooga • Project REACH • Horumarinta Xirfadaha Sinnaanta Jinsiga • School Attendance Matters • Staff Recruitment & Retention Strategies • Shaqaalaha Caaqinta Iskuulka • Horumarinta Sinnaanta Ardayda & Hogaaminta • Kullamada Ardayda • Xulashada Wadashaqaynta

Fiiro gaar ah: Liistada sare ee mudnaanta waa la bedeli karaa iyadoo lagu saleynayo maalgelinta la heli karo iyo arrimo kale oo saameyn kara miisaaniyadda sanadka soo socda. Intaa waxaa dheer, waxaa muhiim ah in la ogaado in inta badan **kharashyadayada loo baahan yahay, sida shaqaaleysiinta iyo shuruudaha gobolka iyo federaalka, aysan ku jirin shaxdan oo ay tahay in la maalgeliyo ka hor wax kasta oo kale.**

Iyadoo lagu salaynayo xogta miisaaniyada ugu badan ee la hayo, SPPS waxay saadaalisay hoos u dhac dhan \$107.7 milyan FY25. Inkastoo tiradani ay tahay horumar laga sameeyay saadaasha asalka ah ee \$150 milyan, waxay weli ka dhigan tahay hoos u dhac weyn oo ku yimid kharashaadka sanadka soo socda. Hoos-u-dhaca la cusboonaysiiyay ayaa isbeddeli doona, go'aannada miisaaniyaddana waxa la samayn doonaa iyadoo lagu salaynayo xogta maaliyadeed ee hadda jirta.

Maxaa Soo Socda

Fadlan la soco macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shirarka miisaaniyada FY25 ee la qabanayo bisha soo socota. Ka qaybgalayaashu waxay baran doonaan wax badan oo ku saabsan sida talooyinka bulshada ay ugu wargelinayaan go'aamada miisaaniyadda. Dugsiyadu waxay sidoo kale qaban doonaan kulamo xogwaraysi ah oo ku saabsan miisaaniyadooda dabayaaqada gu'ga. Fadlan hubi iimaylkaga iyo booqo ([FY25 budget website](#)) websaydka miisaaniyada FY25 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad uga qayb qaadan karto dhawaan.

Waxaan soo dhawaynaynaa ra'yi-celintaada wakhti kasta iyada oo loo marayo foomka Miisaaniyadda FY25 Aan wada hadalno ([Let's Talk form](#). [Answers to frequently asked questions](#)). Jawaabaha su'aalaha soo noqnoqda waxaa laga heli karaa websaydka miisaaniyada FY25. Waxaa naga go'an inaan sii wadno inaan ku siino xogta inta hawshan oo dhan laga gaarayo miisaaniyadda kama dambaysta ah ee la ansixinayo bisha Juun.